**SHARCI - Lamb. 24 ee 18 Maarso 1972**

**Dhisidda Wakaaladda Monoobolyada Dowladda**

**MADAXWEYNAHA**

**GOLAHA SARE EE KACAANKA**

KADIB markii la arkay AXDIGA KOWAAD ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;
IYADOO la tixgeliyey aragtida Golaha Xoghayeyaasha Dowladda;
KADIB markii laga baaran degay oggolanshaha Golaha Sare ee Kacaanka;

**WAXAA LA AMRAY:**

Sharciga hoos ku qoran:

## Cutubka 1aad

Dhismaha, Ujeedada iyo Xubnaha Wakaaladda Madaxa Banaan

### Qod. 1
### Dhismaha

1. Laga bilaabo 1da Janaayo 1972, waxaa la dhisay Wakaaladda Madaxa Banaan ee lagu magacaabay Wakaaladda Maxada Banaan ee Monoboolyo hadda kabina halkaan loogu yeeri doono 'Wakaaladda";
2. Wakaaladdu waxay leedahay maaamul iyo misaaniyad gaar ah oo madax banaan iyadoo si toos ah u hoos imaan doonta Xoghayaha Dowladda ee Maaliyadda.

### Qod. 2
### Ujeedooyinka

1. Wakaaladdu waxay fulin doonta ujeedoyinkaan halkaan ku tixan:
   a) Soo saarista warshadeed, keenista iyo beec gelinta tubaakada ceerinka ah, tubaakada laga shaqeeyey ama si aan dhameestirneeyn loogaga shaqeeyey, ama soo gadashada tubaakada ceyriinka ah ama si aan dhameeystirneeyn loogaga shaqeeyey ee ka soo baxda dalka gudahiisa;
   b) Soo saarka warshadeynsan iyo keenista iyo suuq geynta tarraqa.
2. Wakaaladdu waxay kale oo fulin doonta howlaha lagu xusay nidaamka Monoboolyada Dowladda oo Xeer Nidaamiyaha lamb. 18 ee 30 Luulyo 1955, taas oo lagu fidiyey dhulka oo dhan kadib markii la soo saaray Sharci lamb. 4 ee 11 Abriil 1963 oo loo beddel Sharci lamn 13 ee 20 Juun 1965.

### Qod. 3
### Agaasimaha Guud

1. Kadib markii uu helo tala soo jeedinta Xoghayaha Dowladda ee Maaliyadda, Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanku wuxuu dekreeto ku magacaabi doona Agaasimaha Guud sida ku xusan qod. 1aad ee Sharci lamb. 56 ee 14 Seteembar 1970;
2. Dhaqaalaha Agaasimaha Guud waxaa lagu carifi doona isla dekreetadan.

**Qod. 4**
**Howlaha Agaasimaha Guud**

Agaasimaha Guud wuxuu qaban doonaa howlahaan soo socda:

a) In uu metelo si sharci Wakaalada Madaxa Banaan wuxuuna mas'uul ugaga yahay Xoghayaha Dowladda ee Maaliyadda hortiisa;
b) In uu hirgeliyo amarrada deg degta ah isagoo si dhaqsi leh u soo wargelin doono Xoghayaha Dowladda ee Maaliyadda;
c) In uu haggo hirgelinta howlaha maamulka iyo xisaabatka;
d) In uu isha ku haayo qaabka wax loo maamulo iyo xisaabaadka;
e) In uu soo hordhigo Xoghayaha Dowladda ee Maaliyadda misaaniyadda hor dhaca ah iyo misaaniyadda la isticmaalay oo ay ku lifaaqan yihiin warbixinta Xisaabiyaha Guud si loo aqbalo;
f) In uu adeegsado awoodiisa fulinta ee maamulka caadi ah;
g) In kadib markii uu helo oggolaanshaha Xoghayaha Dowladda ee Maaliyada uu adeegsado awoodiisa aan caadiga ahayn ee maamul;
h) In uu qorsheeyo qaabka maamulidda iyo xisaabta ee Wakaaladda.

**Cutubka 2aad**
Maamulka Xisaabta

**Qod. 5**
**Hantida**

1. Hantida Wakaaladdu waxay ka kooban tahay:
   a) Hantida guurtada ah iyo hantida aan gurtada ahayn oo ay Wakaaladu lahayd waqtiga uu sharcigaanu hirgalayey;
   b) Keydka haraaga ah ee Xoghayaha Dowladda ee Maaliyaddu uu qoondeeyo sanad walba iyadoo la raaci doono qod. 12;
   c) Daqli nooc kasta ah ama deeq amah iyo hanti kale oo soo gaara Wakaaladda;
2. Muddada shaqada Wakaaladdu ay bilaanban doonto ka hor waa in la suubiyaa tirakoob tirada iyo qiimaha hantida guurtada ah iyo midda ma gurtada ah iyo wixii baqaash ah.

**Qod. 6**
**Misaaniyadda hor dhaca ah**

1 Wakaaladdu waa in ay diyaarisa ka hor 31 Luulyo ee sanad kasta misaaniyadda hor dhaca ah ee sanad maliyeed kasta;
2 Misaaniyaddu waa in ay qoondeeysaa daqliga iyo kharajka oo idil, iyadoo jumla ah waana in la horgeeya Xoghayaha Dowladda ee Maaliyadda ilaa iyo 15 Agoosto ee sanad walba;
3 Misaaniyaddu waa in lagu soo lifaaqa misaaniyadda hor dhaca ah ee Dowladda;
4 Sanad misaaniyeeda Wakaaladda waa in ay waafaqsan tahay sanad misaaniyeedka Dowladda.

**Qod. 7**
**Misaaniyadda la isticmaalay**

1) Misaaniyadda la isticmaalay waa in Wakaaladdu ay diyaar gareysa ka hor 15 Maarso ee sanad walba oo la soo dhaafay;

2) Misaaniyadda la isticmaalay waa in laga helaa xogta xisabaadka muujinaya natiijooyinka maamulka lacagta iyo isu dheeli tirka daqliga iyo khrajka la galay iyo kuwii la saadaaliyey;

3) Misaaniyaddan waa in uu ka mid ahaadaa Misaaniyadda la isticmaalay ee Dowladda.

**Qod. 8**
**Heshiisyada**

Heshiis kasto oo qiimihiisu ka badan yahay Sh. 15,000 waxaa loo baahan yahay oggolashada qoraal ah ee Xoghayaha Dowladda ee Maaliyadda.

**Qod. 9**
**Qaabka qeynuuniga ah ee daqliga**

Qaabka qeynuuniga ah ee daqliga Wakaaladda waxaa lagu maamuli doona iyadoo la raacaaya Xeer Nidaamiyaha Maamulka ee Xisaabta Dowladda iyo Xeerka Xisaabaadka ee Dowladda.

**Qod. 10**
**Ku shubidda daqliga ee misaaniyadda**

1) Boqolkiiba 60 daqliga guud ee Wakaaladda waa in maalin kasto lagu wareejiyaa misaaniyadda Dowladda;

2) Boqolkiiba 40ka soo hara wuxuu noqon doona daqli ay Wakaalddu isku maamuli doonto waxaana uu yahay daqliga guud ee xisaabta.

**Qod. 11**
**Diiwaanka daqliga iyo shubista lacagaha**

1. Wakaaladdu waa in ay leedahay diiwaan lagu qoro daqliga iyo lacagaha la wareejiyey ee misaaniyadda iyadoo lagu carifi doono daqliga guud ee maalin laha ah oo lagu tilmaamay iibka, iyo qaabka lacag wareejinta iyo haraaga ay yeelan doonto Wakaaladda sida lagu xusay faqradda 2 ee qodobka sare ku qoran.

**Qod. 12**
**Daqliga dheeraadka ah**

1) Wixii daqli dheeraad ah waa in lagu shubaa misaaniyado iyadoo loo hoggansanaan doono qodobka 10 ee sare ku xusan;

2) Xoghahaya Dowladda ee Maaliyadda wuxuu ku carifi doonaa dekreeto oo uu soo saaro, tirade daqliga oo aan ka badneeyn boqolkiiba 20 in lagu wareejiyo keyd gaar oo ay Wakaaladdu sida ku qoran faqradda ‘b’ ee qodobka 5.

**Qod. 13**

1. Kormeerka xisaabaabka misaaniyadda hor dhaca ah iyo midda la isticmaalay ee Wakaaladda waxaay hoos tegin doonaan sharciga lamb. 16 ee 1 Abril 1970 iyo wax isbedelkii ku yimid ee la xiriira Wakaaladaha Dowladda.

**Cutubka 3aad**
Amarrada Gunaanadka ah

**Qod. 14**
**Xeer Nidaamiyaha**

Xoghayaha Dowladda ee Maaliyadda wuxuu awood u leeyahay in uu soo saaro xeerar nidaamiye ku saabsan qaabka maamulka iyo xisaabadka Wakaaladda.

**Qod. 15**
**Shaqaalaha**

1. Shaqaalaha Wakaaladda waxaa lagu maamuli doona xeerarka shaqaalaha rayidka ee Dowladda;
2. Wakaaladdu waxay qori karta shaqaale dheeraad ah haddii ay marka hore hesho oggolaanshada qoraal ah ee Xoghayaha Dowladda ee Maaliyadda.

**Qod. 16**
**Hirgelinta sharcigaan**

1. Sharcigaani wuxuu hirgeli doonaa sida ugu dhaqsida badan waxaana lagu soo qori doona Faafinta Rasmiga;
2. Sharcigaan waxaa lagu keydin doona Keydka Rasmiga ah ee shuruucda iyo dekreetoyinka Jamhuuriyadda Dimuqratiga ee Somalia;
3. Waxaa qasab ah in loo hoggansanaado sharciga loona hoggamiyo dadka kale.

Muqdisho, 18 Maarso 1972.

Madaxweynaha
Golaha Sare ee Kacaanka
**Sareeye Guuto Mohamd Siyaad Barre**